

HWDSB

Caddaynta Iskuul ku Noqoshada

Ay tahay in la buuxiyo hal mar, ka hor inta aanu ardaygu iman dugsiga.

Waalidka/Koriyaha/Daryeelaha ama ardayga qaaliga ah (hadii da'diisu tahay 18 ama ka weyn tahay):

Ka hor inta aan la bilaabin dugsiga 8da Sibtember, 2020, waalidiinta/koriyeyaasha/daryeelayaasha ama ardayda da'doodu ka wayntahay 18 waa inay dhammaystiraan caddayn hal-mar ah oo sheegaysa waxyaabahan soo socda iyadoo markaasi la xidhiidha shaybaadhka maalinlaha ah ee calaamadaha COVID-19:

Hadii aad wax su'aal ah ka qabto odhaahyadan hoos ku xusan, fadlan la xidhiidh dugsiga ardayda kahor inta aanad dhammaystirin.

Ogow: Kalmada "arday" waxa loola jeedaa inay koobsato islamarkaana ay tilmaanto ilmaha waalidka/koriyaha/daryeelaha ama ardayga hadii da'diisu tahay 18 ama ka wayn tahayba.

Sax sanduuq kasta hadii aad ku raacsan tahay.

- Waxa aan akhriyay oo aan fahmay Tilmaamaha Helitaanka dhukumentiga HWDSB intii lagu gudo jiray COVID-19.
- Waxa aan fahmay in ka hor inta aanay ardaydu iman dugsiga, waa inaan dhamaystiro baadhitaanka COVID-19 ee maalinlaha ah, anigoo markaasi dib u eegaya Liiska Hubinta Shaybaadhka Ardayda ee COVID-19 ee HWDSB ama [isqiimaynta onlaynka ah ee Ontario](#).
- Waxa aan raaci doonaa tilmaamaha ka dib marka aan dhammaystiro shaybaadhka.
- Waxa aan si wacan u fahmay in ardaygu hadii uu dareemayo xanuun in ay tahay inuu joogo guriga aniguna ay tahay inaan la xidhiidho dugsiga si aan ugu wargeliyo maqnaanshiyihiisa.
- Waxa aan fahmay in hadii ardaygu uu bilaabo in uu dareemo xanuun ah calaamadaha COVID-19 inta maalinta lagu gudo jiro, in la kaarantiimayn doono oo la ila soo xidhiidhi doono si aan u kexeeyo iyaga sida ugu dhakhsiyaha badan.
- Waxa aan fahmay in hadii aan ilmaha udiro dugsiga isagoo leh calaamadihii COVID-19, waxa aan khatar galinayaa caafimaadka iyo ammaanka ilmahayga, ardayda kale iyo shaqaalaha.
- Waxa aan fahmay in hadii hal arday oo gurigayga ku nool laga helo COVID-19, ardayda ku nool gurigayga sida ay udhanyihiin guriga ayaa ay joogayaan 14 cisho oo looga bilaabayo wakhtiga ay calaamaduhu kusoo bexeen ama, hadii ay bilaa calaamado yihiin, waxa laga bilaabayaa wakhtiga taariikhda shaybaadhka (ama in kabadanba hadii calaamaduhu aanay soo baaba'ayn).

HWDSB

- Waxa aan fahmay in ay tahay waajib inaan udhammaystiro caddaynta arday kasta kaasoo taga dugsi ah HWDSB gudaheeda.
- Waxa aan fahmay inay tahay waajib inaan udhammaystiro baadhitaanka COVID-19 EE MAALIN LAHA AH arday kasta oo dhigta dugsi HWDSB ah.

Magaca Ardayga

Waalid/Koriye/Daryeele/Arday da'diisu tahay
18+